



DEKEDYARADA (PIER) 58 BIYO-XIGEEN LOO DHAN YAHAY

Dekedyarada (Pier) 58, oo hadda loo yaqaanno Beerta Biyo-xigeenka (Waterfront Park), waa qayb muhiim ah oo lagu fulinayo yoolka ama hadafka Waterfront Seattle oo ah "Biyo-xigeen loo dhan yahay (Waterfront for All)." "Biyo-xigeen loogu talagalay dhamaan." Dekedyarada (Pier) 58, ayaa haatan xiran iyada oo sabab u ah xaaladda dhismaheeda oo liita, si buuxda ayaanna loo beddeli doonaa oo ah qayb ka mid ah Barnaamijka Seattle ee Biyo-xigeenka Magaalada. Dib ayaa loo nakh-shadeynayaa iyada oo diiradda la saarayo in la sii wanaajiyoo gaarista iyo adeegsiga bulshada, iyo abuurista meel soo-jiidanaysa qoysaska. Dekedyarada (pier) dib loo dhisay ayaa sidoo kale sii wanaajin doonta deegaanka xayawaannada badda waxayna bixin doontaa muuqaallada gacan-biyoodka Elliott Bay iyo buuraha olombikada (Olympic Mountains).

QAYBAHA DEKEDYARADA (PIER) EE CUSUB

Goobta ayaa loo nakh-shadeynayaa in ay bixiso barnaamijyo sidii la rabo laga dhigan karo oo debecsan waxaanna ka mid noqon doonna cunsurradan ama qaybahan soo socda:

- **Caws iyo goob la fadhiisto oo sare loo qaadey** oo loogu talagalay in lagu nastro looguna raaxeysto daawashada muuqaalada soo-jiidashada leh.
- **Goob daawasho oo bixinaysa** muuqaalada/aragtiyada furan, waaweyn ee Gacan-biyoodka iyo Buuraha Olombik.
- **Meesha loo dhisay quruxda biyaha ee Fitzgerald**, ee hadda ku taalla Dekedyarada (Pier) 58, ayaa dib loo soo celin doonaa waxaana lagu dari doonaa dekedyarada cusub.
- **Fagaaraaha iyo goobta dhacdooyinka**, ayaa loo adeegsan karaa waxqabadyo xilliyeedka sida bandhigyo faneedka, filimada bannaanada lagu daawado iyo dhacdooyinka kediska ku yimaada.
- **Goob lagu ciyaaro** oo loogu talagalay carruurta iyo qoysaska. Goobtan lagu ciyaaro ee astaanta ah ayaa soo-jiidan doonta dhammaan dadka awodaha, danaha iyo da'aadda kala duwan.
- **Musquusha iyo** goobta adeegaha ee ku dheggen waddada biyo-xigeenka ayaa u adeegaya qoysaska iyo dadka soo boqoda waxayna bixinayaan macluumaad ku saabsan barnaamijaya hadda jira



Qaybaha nakh-shadda ee kor ku xusan ayaa kor u qaadaya goobaha loogu talagalay ciyaarta iyo nasashada.



Goobta ciyaarta waxay leedahay dhisme dheer ama munaarad u ek xayawaan badeedka (jellyfish) oo afar-heer ka kooban, noocyoo kala duwan oo waxyabaha la fuulo ah, boodhadh liiq-liiqda, meel



Dekedyarada (pier) cusub waxaa ka mid ah caws iyo goob la fadhiisto oo sare loo qaadey si loogu raaxeysto daawashada muuqaallada soo-jiidashada leh.



Farshaxan cusub oo ku teedsan waddada biyo-xigeenka

muuqaallo cusub, joogto ah oo lagu rakibi doonno ayaa loogu magacdaarey Qoys(Family), waxaa sameeyay farshaxaniiste degaanka u dhashey oo ka tirsan Qabiilka Puyallup laguna magacaabo Shaun Peterson, ayaa ku salaami doonna dadka soo booqda waddada biyo-xigeenka meel u dhow Dekedyarada (Pier) 58. Muuqaallada saddexda qofood ayaa ku sii jeedi doonna biyaha dekedyarada, dhinac kale ee gacan-biyyodka Jasiirad-u-ekaha Kitsap , halkaasi oo uu ku duugan yahay Hoggaamiyaha Seattle.

SII WANAAJINTA DEEGAANKA

Nakh-shadda Dekedyarada (Pier) 58 waa sii wanaajinta deegaanka, oo ay ka mid yihii kor-u-qaadista marinka uu maro kalluunka doolka ah iyada oo Mashruuca Derbiga Badda la dhammeeyay sannadkii 2017.

Deegaanka ayaa waxaa sii wanaajin doonna:

- Goob furan oo ka sarreysa soonka (soonaha) hirarka oo iftiin dheeraad ah siin doonta deegaanka u dhow dhul-xeebeedka. Tani waxay gacan ka geysanaysaa in ay baxdo dhirta biyaha ka dhex baxda (ama cuntada kalluunka) waxayna kor u qaadysaa guurista kalluunka.
- Iftiinka cusub ee ka dhex baxaya sagxadaha, sida saabka loo adeegsaday dekedyarada (Pier) 62. Iftiinka dheeraadka ah ayaa bixinaya marin amaan ah oo ay maraan kalluunka yaryar oo u dhow xeebta halkaasi oo ay ka jiraan xayawaannada waaweyn ee cuna oo tiradooda yar tahay.
- Dib-u-qaabeynta dekedyarada (pier) si loo sameeyo meel kale oo laga galo oo u dhow dacalka waqooyi ee dekedyarada si kalluunku u soo galo marinka uu maro kalluunka guuraya/haajiraya.

JADWALKA

Dhismaha Pier 58 waxaa lafilaya inuu bilaabmo dabayaqaqada 2022 wuxuuna qaadanayaa qiyaastii labo sano in ladhamayyo.

SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Imayl noogu soo dir: info@waterfrontseattle.org
Naga soo wac: 206.499.8040

BOOQO MAREEGTADEENNA

Isdiiwaangeli si aad iimayl-ka ugu hesho wararkii ugu dambeeyay: waterfrontseattle.org



Saabka ama biraha gudban, ee sida kor ku sawiran ah, iyo sagxadaha kale ee iftiinka gudbiya ayaa bixiya iftiin loogu talagalay



Tani dhamaan musqusha musqusha waxay yeelan doontaa xoogaa banaanka ah, taasoo ka dhigeysa meesha banaan inay dareento hawo iyo furnaan.

Musqul cusub oo ku taalla waddada dhinaceeda kale

Cunsurka ama qayb kale oo loogu talagalay Dekedyarada (Pier) 58 waa dhismaha goob adeeg iyo musqullo cusub oo ku yaalla dhanka kale ee waddada biyo-xigeenka marka laga soo baxo dekedyarada (pier).

Yoolka laga leeyahay musqushan waa in ay bixiso tas-hiilaad soo dhoweyn leh, amaan ah oo nadiif ah, oo uu joogo qof adeegge ah inta lagu guda jiro saacadaha ay furan tahay, si loo sii wanaajiyoo waayo-aragnimada adeegsadaasha kala duwan ee soo booqanaya Waddada biyo-xigeenka. Fikraddu weli waa mid nakh-shad ah waxaanna la dhammeyn doonaa sannadka 2022.